

Qaamo bararka

Waa maxay qaamo barar?

Qaamo bararka waa caabuq faayrus ah ee kowdii saameeyo qanjirada dhareerka ee ku yaalo inta u dhaxeeyso dhagta iyo dhabanka.

Waa maxay astaamaha qaamo bararka?

Astaamaha qaamo bararka waxaa ku jira qandhada heerka hooseeyo, madax xanuunka, muruq xanuun, daalka, cunto yaraanta, iyo bararka qanjirada dhareerka ee ka hooseeya dhagaha iyo dhabanka oo mid ah ama labada dhinac ee wajiga (qanjir bararka).

Dhibaatooyinkee caafimaad ayaa sababa qaamo bararka?

Illaa boqolkiiba 30 ee dadka oo dhan ee saameeyay faayruska qaamo bararka ma lahan astaamo. Xaniinya bararka (bararka xaniinyaha) waa astaan caadi ah ee ragga qaan gaarka kadib. Marmar, bararka laf dhabarta iyo maskaxda (maskax bararka) wuu dhacaa.

Sidee loo ogaadaa qaamo bararka?

Qaamo bararka waxaa lagu ogaan karaa iyada oo la eegayo astaamaha iyo natiijooyinka baaritaanka sheybaarka. Daryeel bixiyayaasha waxay ka qaadi karaan muunooyinka afka ama dhuunta, sidoo kale sida kaadida iyo muunooyinka dhiiga si loo baaro faayruska. Waxaa jira jirooyin kale ee sababi karo astaamaha caadiga ah, marka waa muhiim in baaritaanka sheybaarka saxda ah la sameeyay.

Sidee ayuu qaamo bararka u faafaa?

Qaamo bararka waxaa lagu faafin karaa markii qof qaba qaamo bararka uu ku qufaco ama ku hindhiso dhinacaaga, ama haddii aad taabatid dhacaanada ka imaanaya afka ama sanko qofka qaba qaamo bararka oo katid taabto indhacaaga, sankoaga, ama afkaaga. Wadaagida weelasha cabitaanada, maacunta cuntada, sigaarada, iyo shumiska waa tusaalooyinka kale ee sida faayruska ugu faafi karo dhacaanada u dhaxeeyo shaqsiyaadka.

Intee ayuu qofka qaba qaamo bararka faafiyaa?

Qaamo bararka wuxuu ku faafi karaa 2 maalmood astaamaha ka hor ee muuqdo illaa qiyaastii 5 maalmood kadib. Qaamo bararka waa faafida ugu badan 48 saacadood ka hor intaysan jirada bilaaban.

Miyuu jiraan tallaalka qaamo bararka?

Haa. Tallaalka qaamo bararka wuxuy wataa tallaalka MMR (Jadeecada, qaamo bararka, Jadeecada Rubella). Hal gojo ee tallaalka qaamo bararka wuxuu waxtarayaa qiyaastii boqolkiiba 80 ee dadka la talaalay, laakin 2 garoojo ee tallaalka qaamo bararka wuxuu waxtarayaa qiyaastii boqolkiiba 90 ee dadka. Tani waxay la micna tahay in weli ay suurto gal u tahay qofka qaba 2 garoojo ee MMR inuu ku dhaco qaamo bararka. Ka baro wax badan Qoraalka Warbixinta Tallaalka [MMR \(Jadeecada, Qaamo bararka iyo Jadeecada Rubella\) \(VIS\)](http://www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/mmr.html) (www.cdc.gov/vaccines/hcp/vis/vis-statements/mmr.html).

Maxaa la sameyn karaa si looga hortago qaamo bararka?

Wadada ugu wanaagsan ee looga hortago qaamo bararka waa in la helaa tallaalka. Dadka qaba qaamo bararka waa inay joogaan guriga 5 maalmood kadib markuu bilowdo bararka si markaas aysan ugu faafin dadka kale.

Miyay jiraan daaweyn qaamo bararka ah?

Maya, kaliya daryeelka astaamaha.

Vaccine-Preventable Disease Section
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/immunize

Si aad ugu heshid warbixintaan qaab kale duwan, soo wac: 651-201-5414.